# Xaashida macluumaadka

**Ciwaanka waxbarashada:** Qiimaynta lagu sameynayo Adeegga Turjubaanka Bilaashka ah ee xirfadlayaasha caafimaadka allied health

**Baaraha ugu sarreeya:** Jill Waddell, Madaxa Adeegyada Qiimaynta iyo La-talinta, Saaxiibada Daryeelka Caafimaadka Australia

**Maareeyaha mashruuca:** Esther White, La-taliye sare, Saaxiibada Daryeelka Caafimaadka Australia

**La xidhiidh:** FIS.evaluation@ahaconsulting.com.au ama 61 3 8632 9503

## Hordhac

Dawlada Australia waxay tijaabinaysaa adeeg cusub oo siinaya dadka aan luuqada ingiriiska ku hadlin inay helaan turjubaano lacag la'aan ah markay isticmaalayaan adeegyada caafimaadka ee gaarka ah sida cilmu-nafsiga, dhakhaatiirta indhaha iyo jir-dhiska fiisiyoterabiga (physiotherapists). Dawladdu waxay weydiisatay Saaxiibada Daryeelka Caafimaadka Australia (Australian Healthcare Associates - AHA) inay soo ogaadaan in turjubaanada lacag la'aanta ah ay dadka ka caawiyaan inay si fudud u helaan daryeel caafimaad.

Maadaama aad isticmaashay adeegga turjubaanka cusub, ayna da'daadu ka weyn tahay 18 sano, waxaan rabnaa inaad ka qeyb qaadato xog-ururinta.

Adiga ayaa dooran kara haddii aad doonayso inaad ka qayb qaadato. Khasab kuguma aha inaad ka qeyb qaadato xog-ururinta. Xitaa haddii aad go'aansato inaad ka qeyb qaadato, xilli kasta ayaad ra'yigaaga bedali kartaa oo aad isaga bixi kartaa xog-ururintan.

## Maxay tahay in aan sameeyo?

Waxaa lagu weydiin doonaa inaad buuxiso xog-ururin kooban oo ku weydiin doonta:

- Ilaa heerkee ayaad ku qanacsanayd adeega turjubaanka?
- Helitaanka aad heshay turjubaan miyeey kaa caawisay inaad si fiican u fahanto caafimaadkaaga iyo daawayntaada?
- Intee in le'eg ayaad ku qanacday tayada tarjumida?
- Maxaad sameyn lahayd haddii aan adeegga turjubaanka la heli lahayn?
- Sidee adeega turjubaanka loogu wanaajin karay siduu ahaa?

Si ay kuugu sahlanaato dhameystirka xog-ururintan, waxaad awoodi doontaa inaad jawaabahaaga ka xulato liiska. Waxaad sidoo kale suaalaha uga jawaabi kartaa sida aad jeceshahay; qasab maaha inaad jawaabta ka xulato mid ka mid ah jawaabaha liiska sidoo kalena waad ka boodi kartaa su'aalihii aadan doonayn inaad ka jawaabto.

Xog-ururintu waxay qaadan doontaa ilaa 15 daqiiqo. Adiga ayaa dooran kara sida aad jeclaan lahayd inaad u samayso xog-ururinta:

- **Online:** Waxaad xog-ururinta samayn kartaa adiga oo isticmaalaya kombiyuutarkaaga ama telefoonkaaga [Free interpreting service evaluation](). Xog-ururinta online ka waxay ku qoran tahay luuqada Ingiriiska iyo luuqado kale oo dadku badanaa ku hadlaan. Haddii luqadaada aysan ku jirin, waxaad xog-ururinta ku sameyn kartaa taleefanka ayadoona laguu qaban doono turjubaan lacag la'aan ah.
- **Taleefanka:** Waxaad xog-ururinta ku samayn kartaa taleefoonka ayadoona laguu qaban doono turjubaan lacag la'aan ah. Wac 61 3 8632 9503.
- **Qaab qoraal ah:** Waxaad xog-ururinta u samayn kartaa qaab qoraal ah oo luqad kasta leh. Haddii aad doonayso xog-ururinta lagu sameynayo foomka, iimayl u dir FIS.evaluation@ahaconsulting.com.au. Waan ku soo diri doonaa iyadoo waliba ay la socoto bashqad aad jawaabaha noogu soo diri karto.

Haddii aadan awoodin inaad xog-ururinta uga qeyb qaadato inta siyaabood ee kor ku xusan midkoodna, iimayl u dir FIS.evaluation@ahaconsulting.com.au. Waxaan isku dayi doonaa inaan kuu helno hab kale oo aad kaga qayb qaadan karto.

## Lacag ma la igu siin doonaa?

Waxaan ku siin doonaa $30 oo kaadh hadiyad ah si aan kaaga mahadcelino wakhtigaaga.

Si aad u hesho kaadhka hadiyadda, waxaa loo baahan yahay inaad dhamaadka xog-ururinta nala wadaagto magacaaga iyo iimaylkaaga. Waadse ka qeybgeli kartaa xog-ururintan adigoon nala wadaagin macluumaadkaas, balse ma awoodi doono inaan kuu soo dirno kaadhka hadiyadda.

## Maxay yihiin faaiidooyinka ka dhalan kara xog-ururintan?

Dawladdu waxay doonaysaa in ay u isticmaasho ra'yigaaga sidii ay dadka ugu fududayn lahaayeen isticmaalka turjubaanada marka ay u baahan yihiin daryeel caafimaad.

## Maxaa khatar ah oo ka imaan kara?

Ma fileyno khatar weyn oo imaan karta haddii aad ka qaybgasho.

## Ma khasab baa inaan ka qeyb qaato xog-ururintan?

Adiga ayaa ikhtiyaar leh haddii aad rabto inaad ka qeyb qaadato xog-ururinta iyo haddii kale. Wax saameyn ah kuma yeelan doonto xiriirka aad la leedahay xirfadlayaasha caafimaadka ama turjumaanada allied health.

Xilligaad doonto ayaad isaga bixi kartaa, xitaa markaad bilowdo ka dib. Haddii aad rabto in jawaababahaaga la tirtiro, iimayl u dir FIS.evaluation@ahaconsulting.com.au. Laakin haddii aadan nala wadaagin faahfaahinta xiriirkaaga, suurtagal maaha inaan aqoonsano jawaabahaaga, markaa ma tirtiri karno.

## Maxaa lagu sameyn doonaa macluumaadka aan bixinayo?

Wax kasta oo aad nala wadaagto waxay noqon doonaan wax aysan dadku ogaan doonin. Lama wadaagi doono dad kale inaad adigu fasax noo siiso ama in uu sharcigu nagu qasbo inaan la wadaagno mooyee.

Haddii uu turjubaan ku caawiyo inta lagu guda jiro waraysigaaga, waa khasab inay u hogaansamaan xeerka anshaxa ee rasmiga ah. Taasi micnaheedu waxay tahay waxaa looga baahan yahay inay xafidaan wax kasta oo aad sheegtay. Xog-ururinta ka dib, ma heli doonaan macluumaadkaaga.

Waxaan xogtooda ururin doonaa ku dhawaad 60 qof oo isticmaalay adeega turjumaada lacag la'aanta ah. Marka aan warbixin u qorno dawladda, waxaan xaqiijin doonaa inaan cidna la aqoonsan karin. Waxaan hayn doonaa jawaabaha xog-ururinta ilaa 5 sano kadib marka uu mashruuca dhamaado. Markaas kabacdi waanu tirtiri doonaa.

## Ma la ila wadaagi doonaa natiijada daraasaddan?

Waxaanu warbixintayada siin doonaa Waaxda Caafimaadka, Naafada iyo Gabowga (Department of Health, Disability and Ageing) bisha Nofeembar 2025. Waxaa laga yaabaa inay waaxdu daabacdo warbixinta.

## Yaa maalgelinaya daraasaddan?

Daraasaddan waxaa maalgelisay Waaxda Caafimaadka, Naafada iyo Da'da (Department of Health, Disability and Ageing) ee Dowladda Australia.

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Waxaad nagala soo xiriiiri kartaa:

61 3 8632 9503

FIS.evaluation@ahaconsulting.com.au

Ama weydiiso qof aad ku kalsoon tahay inay nala soo xiriiraan iyagoo adiga ku matalaya.

## Yaa dib u eegay daraasaddan?

Guddiga Anshaxa Cilmi-baarista ee Bellberry ayaa dib u eegay oo ansixiyay daraasaddan si waafaqsan Bayaanka Qaranka ee Dhaqanka Anshaxa ee Cilmi-baarista Aadanaha (2023). Bayaankan waxaa loo sameeyay in lagu xafido danaha dadka aqbalay inay ka qayb qaataan daraasaadka cilmi baarista aadanaha.

Haddii aad doonayso inaad kala hadasho daraasadda ama aad rabto inaad aragto nuqul ka mid ah habraaca Cabashada qof aan si toos ah ugu lug lahayn, gaar ahaan arrimaha khuseeya sharciyada, macluumaadka ama cabashooyinka ku saabsan hab-dhaqanka daraasadda ama xuquuqdaada ka qaybqaate ahaan, waxaad la xiriiri kartaa Maareeyaha Hawlaha, Bellberry Limited 08 8361 3222.

## Ogolaansho/fasax-bixin

Markaad dhamaystirto ra'yi ururinta, waxaad muujinaysaa inaad fahantay macluumaadka lagula wadaagay, aadna ku faraxsan tahay inaad ka qayb qaadato, sidoo kalena aad ogoshahay inaan anagu u isticmaalno jawaabaha xog-ururinta ku jira warbixintayada.